

Wicitaanada Xiriiriyaha Carruurnimada Hore | Jiilaalka 2025

Warsidahaaga saddex biloodlaha ah ee ku saabsan daryeelka carruurta iyo waxbarashada hore.

Waxaa ka mid ah warsidahan

Wicitaanada Xiriiriyaha Carruurnimada Hore Jiilaalka 2025	1
Ku soo dhawow Xiriiriyaha Carruurnimada Hore	2
Wicitaanada Xiriiriyaha Carruurnimada Hore	2
Minnesota waxay heshay Deeqda Horumarinta Dugsiyada Barbaarinta oo cusub	3
Ha seegin Dheefaha Canshuurta Carruurta	3
Shatiga iyo shahaadaynta daryeelka carruurta wuxu u guuraya ee DCYF	4
Barta Bixiyaha iyo Wakaalada	5
Cusboonaysiinta Casriyaynta Xeerka Daryeelka Carruurta	5
Ilaha Qoysaska, Carruurta iyo Bixiyeyaasha	5
Ma qabtaa su'aalo?	5
Ma haysaa jawaab celin?	6

Ku soo dhawow Xiriiriyaha Carruurnimada Hore

Waad ku mahadsan tahay iska diiwaangelintaada Warsidaha Xiriiriyaha Carruurnimada Hore! The Minnesota Children's Cabinet iyo the Departments of Education, Health, Human Services, and Children, Youth, and Families ayaa abuuray warsidahan si loo fududeeyo isgaarsiinta adeeg-bixiyeyaasha daryeelka carruurta iyo macallimiinta hore ee Minnesota. Adeeg-bixiyeyaasha daryeelka carruurta iyo macallimiinta waxbarashada hore waxay filan karaan warside saddexdii biloodba mar ah iyo wararka kale oo cusub oo ay iimeyl ku helaan. Fadlan buuxi sahanka ku lifaaqan hoosta warsidahan si aad noo ogeysiiso waxa aad u maleyneyso waxyaabaha ku jira iyo sida aan u horumarin karno isgaarsiintena.

Wicitaanada Xiriiriyaha Carruurnimada Hore

Saddexdii biloodba mar, gobolku wuxuu martigeliyaa Wicitaanada Xiriiriyaha ee adeeg-bixiyeyaasha daryeelka carruurta iyo macallimiinta hore si ay uga jawaabaan su'aalaha la xiriira sharciga, shati bixinta, barnaamijyada, deeqaha iyo qaarkale oo badan. Ujeedada wicitaanku waa in laga jawaabo caddeynta su'aalaha laga yaabo in adeeg-bixiyeyaasha ay qabaan. Wicitaanada waxa lagu dhexqabtaa onlay ahaan barta WebEx, [waana la duubaa dadwaynaha ka soo qaybgeli kari waayayna toos.](#)

Dhammaan macallimiinta noocyada kala duwan waxaa lagu casuumayaa wicitaanadaas. Waxaanu soo dhaweyneynaa su'aalaha ka imanaya barnaamijyada dugsiyada carruurnimada hore, barnaamijyada shatiga leh, xarumaha shahaadada leh, barnaamijyada ka reeban, adeeg bixiyeyaasha sharciga ah ee aan shatiga lahayn, Qoyska, Asxaabta iyo daryeelayaasha Deriska, iyo shakhsiyaadka xiiseynaya inay bilaabaan ganacsiga daryeelka carruurta.

Nagu soo biir Wicitaanka Xiriiriyaha Carruurnimada Hore ee Xiga

- **Taariikhda Wicitaanka Xiga:** Salaasada, Abriil, 15, 2025, 7-8 fiidnimo.
- **Halkee:** Lagu martigelinaya khadka tooska ah gudaha WebEx
- **Linkiga Kulanka:**
<https://minnesota.webex.com/minnesota/j.php?MTID=m62fd4e54008f5f9df93e4b04d3deff24>
- **Ujeedada:** Si gobolka uga jawaabo su'aalaha caddeynta ee adeeg bixiyeyaasha daryeelka carruurta iyo macallimiinta waxbarashada hore. Gobolku wax kama qaban doono cabashooyinka shakhsi ahaaneed inta lagu jiro waqtigan.
- Fadlan [kusoo gudbi su'aalahaaga halkan](#). Su'alaha waa in la soo gudbiyaa ka hor dhacda; kama jawaabi doonno su'aalaha tooska ah. Waxaan ku dedaalaynaa inaanu sida ugu fiican uga jawaabno dhammaan su'aalaha sida waqtigu noo oggolaado. Fadlan soo gudbi su'aalahaaga laba toddobaad ka hor wicitaanka.

Fadlan jadwalkaaga ku keydso taariikhda iyo linkiga kulanka; gobolku ma soo diri doono casuumaadda kulanka. Wicitaanka waa la duubi doonaa oo si ku meel gaar ah ayay u heli doonaan dadka aan imaan karin.

[Wax badan ka baro Wicitaanada Xiriiriyaha Carruurnimada Hore, oo ay ku jiraan Taariikhaha soo socda, oo halkan ku soo gudbi su'aalahaaga.](#) Waxaan rajeyneynaa inaan kugu aragno wicitaanada soo socda!

Minnesota waxay heshay Deeqda Horumarinta Dugsiyada Barbaarinta oo cusub

Minnesota waxay deeq gaaraysa \$24 milyan ka heshay dawladda federaalka, oo ah wareegga xiga ee deeqda [Preschool Development Grant \(PDG\)](#). Deeqdu waxay bixisaa \$8 milyan sanadkiiba illaa Sibteembar 2027 waxayna sii wadi doontaa shaqada iskaashiga ee gobolka si loogu taageero carruurta iyo qoysaska. Kooxda PDG ee gobolka way ku faraxsan tahay fursadaha deeqdan ay siin doonto Minnesota!

Halkan waxa ku qoran guudmarka waxa PDG ku dhex qabanayso MN:

- Maalgelinta [MN StoryCollective](#), mashruuc sheeko-wadaag ah oo la shaqeeya la-hawlgalayaasha bulshada si loo ururiyo sheekooyinka. Kadibna mashruucu wuxuu isu keenaa dadka ka kala yimid Minnesota oo dhan si ay u fahmaan waxyaabaha la wadaago iyo inay aqoonsadaan fursadaha ay wax ka qaban karaan.
- Ballaarinta mashruucyada ka-qaybgalka qoyska iyo ka shaqeynta in la hirgeliyo golaha la-talinta waalidka ee gobolka oo dhan.
- Sii wadida dedaallada gaarsiinta isku dhafan si la iskugu dubbarido adeegyada iyo ilaha noocyada kala duwan ee daryeelka iyo barnaamijka waxbarashada hore.
- Sii wadida shaqada cabbirada mushaharka iyo magdhawga shaqaalaha.
- Buuxinta Sahanka la qabsashada dhaqamada ee the Ages & Stages Questionnaires® ee loogu talagalay dadka Hindida Mareykanka ee Minnesota.
- Cusboonaysiinta sheekooyinka xogta iyada oo loo marayo nidaamka [Early Childhood Longitudinal Data System](#).
- Kordhinta Shaqaalaha Caafimaadka Maanka ee Dhallaanka iyo Carruurnimada Hore

Hawlihi hore ee deeqda waxaa ka mid ah bilaabista [Help Me Connect](#), taageerida deeqaha [Community Solutions for Healthy Child Development Grants](#), iyo taageerida shaqaalaha carruurnimada hore, oo ay ku jiraan [waxbarashada banaanka](#), [kala guurka dugsiga barbaarinta](#), iyo [Baaritaanka Carruurnimada Hore](#). Ka eeg [codsiga dhammeystiran](#) gudaha [Bogga websaydhka PDG](#).

Ha seegin Dheefaha Canshuurta Carruurta

Adiga iyo qoysaska aad u adeegto waxaad xaq u yeelan kartaan Dheefta Canshuurta Ilmaha oo ah \$1,750 ilmo kasta oo u qalma. Tani waa dheef dib laguugu soo celin karo, taasoo la micno ah inaad heli karto lacag celin xataa haddii aan laguugu lahayn wax canshuur ah.

Waa maxay Dheefta Canshuurta Carruurta?

[Child Tax Credit](#) waxaa heli karaa dadka Minnesota deggan ee leh carruur ka yar 18 sano. Markaad xareyso canshuur celinta Minnesota, waxaad halkii ilmo ee u qalma oo kasta ku heli kartaa \$1,750 iyadoo aanay wax xad ah ku xirnayn tirada carruurta. Dheeftu si tartiib ah ayay u joogsataa haddii dakhligaagu ka sareeyo \$31,090 (\$36,880 ee Xareynta Dadka Is Qaba).

Sidee ayaan ku codsan karaa Dheefta Canshuurta Carruurta?

Buuxi [Jadwalka M1DQC](#), ee [Dadka kugu Tiirsan iyo Carruurta u Qalma](#), si aad u go'aamiso ilmaha u qalma

Canshuurta Carruurta. Kadibna, buuxi [Jadwalka M1CWFC, Dheefta Carruurta iyo Qoysaska Shaqeeya ee Minnesota](#), si aad u go'aamiso qadarka dheeftaada.

Lacagaha Hormariska ah ee Dheefaha Canshuurta Carruurta

Laga Bilaabo Sannad Canshuureedka 2024, waxaad dooran kartaa inaad u hesho qayb ka mid ah Dheefta Canshuurta Carruurta ee sannadka soo socda qaab saddex lacagood oo hormaris ah ka hor intaanad xareyn canshuurcelintaada dakhliga soo socda. Minnesota waa gobolka ugu horreeyay ee dalka ee bixiya [ikhtiyaarkan loogu talagalay qaatayaasha Dheefta Canshuurta Carruurta](#).

Canshuur diyaarin bilaash ah

Waxaad sidoo kale u qalmi kartaa diyaarinta canshuur celinta oo bilaash ah. Tag [Websaydhka Waaxda Dakhliga ee Minnesota Department of Revenue](#) oo ku qor canshuur diyaarin bilaash ah (free tax preparation) sanduuqa raadinta si aad u hesho adeegyada diyaarinta canshuurta oo bilaash ah ee kuugu dhow.

Shatiga iyo shahaadaynta daryeelka carruurta wuxu u guuraya ee DCYF

Xagaagan, shatiga iyo shahaadaynta daryeelka carruurta waxay ka guuri doonaan Waaxda Department of Human Services (DHS) una guurayaan Department of Children, Youth, and Families (DCYF). Heerarka shatiga iyo shahaadaynta ee hore u jiray ee hadda laga helo Xeerarka Minnesota, cutubka 245A iyo cutubka 245H, waxay u guuri doonaan cutubyada cusub ee 142B (shatiga) iyo 142C (shahaadaynta) ee Xeerarka Minnesota. Shuruudaha ku jira Xeerarka Minnesota ma guuri doonaan. Goobaha cusub ee xeerarku waxay dhaqangeli doonaan ka dib u guurista DCYF (oo la filayo Juun 2025). Shuruudaha shatiga iyo shahaadaynta weli sidoodii oo waxba iskama beddelin, kaliya meesha laga helo iyaga ayaa isbeddelaysa. Si aad u aragto sida ay tani u saameyn doonto xeerarka, dib u eeg dukumintiyada [guudmarka shatiga](#) iyo [guudmarka shahaadaynta](#). Dukumiintiyadan ayaa qeexaya halka shuruudaha hadda laga helayo iyo halkay kaga qornaan doonaan cutubyada cusub ee xeerka.

Su'aalaha Inta Badan La Is Weydiiyo

Xagee ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kala-guurka?

- Booqo [websaydhka kala-guurka](#) ee DCYF.

Weli ma isticmaali doonaa Barta Bixiyaha?

- Haa, qof kasta oo hadda isticmaala Barta Bixiyaha wuu sii wadi doonaa isticmaalka ka dib marka shatiga loo wareejiyo DCYF.

Ma isbeddeli doonaan bogagga daryeelka carruurta ee qoyska iyo xarrunta daryeelka carruurta? Xagee ayaan ka raadiyaa macluumaadka cusub?

- Boggaga DHS ee xarunta daryeelka carruurta iyo xarunta daryeelka carruurta ee qoyska ee leh ee shatiga iyo shahaadada ayaa sii ahaan ilaha xogta ee adeegbixiyayaasha. Bogagga websaydka waxaa loo wareejin doonaa qaab qayboqaybo ah.

Siddee ayaan ku heli karaa shati bixiye inta lagu jiro ama ka dib kala-guurka?

- Xarumaha daryeelka carruurta ee leh shatiga ama shahaadada waxay sii wadi karaan inay la xiriiraan shati bixiyahooda ama shati bixiyaha diyaarka ah.
- Bixiyayaasha daryeelka carruurta ee qoyska waxay sii wadi karaan inay la xiriiraan shati bixiyaha degmadda.

Macluumaad dheeraad ah ayaa lala wadaagi doonaa bixiyeyaasha wixii ku saabsan kala-guurka bilaha soo socda.

Barta Bixiyaha iyo Wakaalada

Barta Bixiyaha iyo Wakaaladaha ayaa u diyaar ah xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga leh, xarumaha daryeelka carruurta ee shahaadada leh, iyo shati bixiyayaasha gobolka Minnesota. Hagaajinta joogtada ee nidaamka oo ku saleysan jawaabcelinta isticmaaleyaashi hore, oo ay weheliso waxqabad dheeri ah, ayaa ahayd mudnaantii koowaad ee sanadkii la soo dhaafay. Bilaabida daryeelka carruurta qoyska iyo shati bixiyeyaasha degmada waxa la filayaa inay bilaabmaan xagaaga 2025. Intaas waxaa dheer, websaydhka licensing information lookup (LIL) iyo dib u qaabeynta shaqaalaha waxa loo qorsheeyay in la sii daayo xagaaga 2025. Kuwa ku lug leh bilaabida qaybaysan ee soo socota, faahfaahin dheeraad ah ayaa si toos ah loola wadaagi doonaa bilaha soo socda. Kala soco wixii wargelin ah [gudaha websaydhkan](#)

Cusboonaysiinta Casriyaynta Xeerka Daryeelka Carruurta

Kooxda Mashruuca Casriyeynta Daryeelka Carruurta waxay jeclaan lahaayeen inay u mahadceliyaan qof kasta oo dib u eegay oo bixiyay jawaabcelin ku saabsan qabyoqoraalka koobaad ee mashruuca heerarka shatiga daryeelka carruurta dib loo eegay ee la sii daayay Abriil 2024. Jawaabcelinta la soo uruuriyay ee ku saabsan qabyoqoraal kasta inti lagu jiray xagaaga 2024 waxaa lagu soo koobay warbixinnada mawduucyada muhiimka ah ee [daryeelka carruurta qoyska](#) iyo [xarumaha daryeelka carruurta](#). Bishii Nofeembar 2024, DHS waxay daabacday oo qaybisay warbixinno, kuwaas oo laga heli karo [websaydhka mashruuca](#) ee ku hoos jira daaqadaha Get Involved iyo Resources.

Fadlan kala xiriir kooxda mashruuca halkan ceregmodernization.dhs@state.mn.us wixii su'aalo ah.

Ilaha Qoysaska, Carruurta iyo Bixiyeyaasha

- [Ilaha Dheeraadka ah ee Qoysaska, Bixiyeyaasha iyo Bulshooyinka](#)
- [Help Me Connect](#)
- [Office of the Ombuds for Family Child Care Providers](#)

Ma qabtaa su'aalo?

Imeyl u dir ccs.communications.DHS@state.mn.us wixii su'aalo ah.

Ma haysaa jawaab celin?

Nala soo socodsii fikradahaaga ku saabsan warsidahan [adiga oo buuxinaya ra'yi uruurintan kooban](#).

Jawaabahaagu waxay ka caawin doonaan gobolka inuu hagaajiyo xiriirka uu la leeyahay adeegbixiyeyaasha iyo macallimiinta daryeelka carruurnimada hore.